



## Fasaxa Shaqada: Qoysaska Ciidamada


Time Off from Work: Family in the Military

Covid-19 xog: <https://www.dol.gov/agencies/whd/fmla/pandemic>

### Shaqada fasax ma uga qaadan karaa sababtoo ah qof qoyskayga ka mid ah oo ciidanka wadanka ka tirsan?

Waxaa suurogal ah in aad qaadan karto shaaqada ka qaadan karto fasax lacag la'aan ah (fasax) ee haddii qof qoyska ah ka tirsan ciidamada gaashaandhigga. Waa in aad ka soo baxdaa shuruudaha ku xiran **Sharciga Fasaxa Caafimaadka Iyo Qoyska (FMLA)**. Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha, waxa aad xaq u leedahay in aad fasax u qaadan karto xubin qoyska ah oo ka tirsan ciidamada.

Fasaxa waa mid lacag la'aan ah, laakiin xaaladaha qaarkod, waxaa laga yaabaa in shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha ku heshiiyaan in ay ku bedelaan fasax bukaanka ama fasax caadi ah. Mudada aad fasaxa ku jirto, ceymiskaaga caafimaadka waad heysaneysaa sidii adiga oo sheqeynaya oo kale. Laakiin Waa in aad bixisaa lacagta bisha ee ceymiska.



- **Fasaxa Daryeelka Qof Ka Tirsan Ciidamada (MCL):** Haddii xaaskayga/saygaaga, ilmahaaga, waalidkaa, ama qof leh dhaxalkaaga uu ciidanka ku jira u xanuunsado ama dhaawac gaaro, waxa aad qaadan kartaa ilaa 26 todobaad oo fasax ah mar kaliya muddo 12 bilood ah si aad u daryeesho. Taas waxaa ka mid ah xubnaha ciidamada gaashaandhigga, daraawiishta ama Keydka, iyo dadka ka tagay ciidamada 5tii sano ee la soo dhaafay.
- **Fasaxa Dib Ugu Yeeridda Ciidamada (QEL):** Haddii xaaskayga/saygaaga, ilmahaaga, waalidka loogu yeeray ciidamada, waxa aad xaq u leedahay fasax si aad xaaladda wax uga qabato. Ciidanka loogu yeeray waxaa loola jeedaa:
  - Xubnaha ka tirsan Ciidamada Gaashaandhigga - xubnaha ka tirsan ciidanka oo loogu yeero in ay soo shaqo tagaan loona daabulo waddan kale ama
  - Xubnaha ka tirsan ciidamada keydka (sida Daraawiishta iyo Keydka) - oo loogu yeero in ay soo shaqo tagaan loona daabulo waddan kale sida uu dhigayo amarka loogu yeeray ama ay taageeraan hawlgalka ciidamada ee ka qeyb qaadanaya hawlgalka.

Fasaxa QEL waxaa loo adeegsan karaa waxyaabaha la xiriira hawlgalka ciidamada ee xubinta ka tirsan qoyska. Waxyaabaha ay ka mid yihiin:

- Waxyaabaha ka dhasha wargelinta degdegga ah ee u yeeridda (waxka yar hal todobaad)
- Xafladaha ciidamada/dhacdooyinka
- Heynta ilmaha ee ka baxsan tan caadiga ah
- Xanaanaynta waalid qof ciidanka wadanka ka mid ah oo aan isagu is-daryeeli karin
- Diyaarinta waxyaabaha la xiriira sharciga/maaliyadda

- Arrimaha la xiriira la talinta
- Ilaa 15 maalmood oo aad la qaadato xubnaha qoyska mudada uu nasanayo oo ku jiro ka soo kabashada.
- Daabulidda ka dib, sida xafladda soo dhaweynta marka ay dib u soo noqdaan.
- Waxyaabaha ka dhasha geerida xubin qoyska ah ooka tirsan ciidamada.

**Macluumaad dheeraad ah oo laxiriira waxa aad ka bogga internetka ee Wasaaradda Shaqada ee Mareykanka [www.dol.gov/agencies/whd/fmla](http://www.dol.gov/agencies/whd/fmla).**

### **Ugu horeyn, Ma Codsan Karaa FMLA?**

Si aad uga soo baxdo shuruudaha fasaxa FMLA waa in aad

- 1) U shaqeysaa loo shaqeeyaha sharcigu waajib kaga dhigayo,
- 2) In aad shaqeysay 1,250 saacadood 12ka bilood ee ka horeeya inta aanu fasaxu kuu bilaaban.
- 3) In aad ka shaqeyso goob ay 50 ama wax ka badan oo shaqaale ah ka shaqeeyaan ama meel u jirta 75 mayl, oo aad
- 4) u shaqeysay loo shaqeeyaha 12 bilood.

**Fiiro gaar ah:** Macluumaadkan waa mid dhalin kara jahawareer. Macluumaad dheeraad ah, xogta urursan iyo foomamka laga hadlayo ee ku saabsan arrintan soo booqo:

[www.dol.gov/agencies/whd/fmla](http://www.dol.gov/agencies/whd/fmla). Ama soo wac Wasaaradda Shaqada ee Mareykanka ee 1-(866) 4-US-WAGE ama 1-(866) 487-9243.

### **Maxaa la iga doonayaa si aan u codsado fasaxa?**

Waa in aad siisaa goobta shaqada ogeysiin ku filan intii suurogal ah. Ka dib marka aad gaarsiiso ogeysiiska, waa in ay muddo 5 cisho gudahood ah kugu siiyaan "Ogeysiiska Ka Soo Bixidda Shuruudaha iyo Mas'uuliyadda" (foomka WH-381) Waa in loo shaqeeyuhu kuu soo diraa "Ogeysiiska Wargelinta" (WH-382) Ogeysiiskan waa kan lagugu wargeliyo in codsigaaga la ogolaaday ama la diiday.



#### **→ Haddii aad codsaneyso fasaxa MCL**

Waxaa lagaa doonayaa in aad bixiso 30 maalmood oo ogeysiis ah haddii aad qaadaneyso fasax caafimaad oo horay loo sii qorsheeyey ama xanuun la soo darsay qofka ciidamada ka tirsan. Haddii aad ogsoon tahay in aadan u baahan tahay fasax laakiin aadan siin karin 30 maalmood oo ogeysiis ah, waa in aad siisaa ogeysiiska sida ugu dhaqsaha badan.

Waxaa laga yaabaa in madaxdaadu kugu khsabaan in aad keento warqad dhakhtar. Foomka aad u baahan tahay waxaa la yiraahdaa "Cadeynta Xanuun Khatar Ah Xanuun Qof Ciidamada ka tirsan - Ee Fasaxa Ciidamada (Sharciga Caafimaadka Iyo Qoyska)" (Foomka WH-385). Foomka waa inuu kuu buuxiyaa dhakhtarka xubinta qoyska ee ka tirsan ciidamada. Loo shaqeeyaha waa in ay ku siiyaan haddii ay doonayaan in aad buuxiso.

## Ma khasab baa in fasaxa oo dhan aan markaliya wada qaato?

Maya. Fasaxa muhimka u ah caafimaadka qeyb ahaan ayaad la qaadan kartaa xubinta qoyska ee ka tirsan ee dhaawacu gaaray ama xanuunsan. Haddii aad dooneyso in aad fasaxa u qaadato sabab caafimaad oo horay loo qorsheeyey, la socodsii loo shaqeeyaha sida ugu dhaqsaha badan oo **ku dadaal** in aadan qalalaalse gelin shaqada.

### → Haddii aad codsaneyso fasaxa QEL

Marka aad ogaato in aad u baahan tahay fasax, isla markiiba la socodsii loo shaqeeyahaa.

Haddii aad codsaneyso QEL, waxaa suurogal ah in goobta shaqadu ku weydiistaan in aad buuxisaa foomka “Cadeynta Dib Ugu Yeeridda ee Xubin Qoyska oo ka tirsan Ciidamada” (Foomka WH-384) Loo shaqeeyaha waa in ay ku siiyaan haddii ay doonayaan in aad buuxiso.

Waxaa laga yaabaa in lagaa doonayo in aad loo shaqeeyaha siiso amarka xubinta ciidamada ka tirsan loogu yeeray shaqada marka ugu horeysa ee aad codsato QEL. Loo shaqeeyaha ayaa kuu sheegaya haddii ay kaa doonayaan iyo haddii kale. Waa in aad macluumaadkaas siisaa mar kaliya mar kasta oo shaqada loogu yeero. Waxaa kale oo suurogal ah in loo shaqeeyaha ku weydiisto macluumaad dheeraad ah.

## Ma khasab baa in fasaxa oo dhan aan markaliya wada qaato?

Maya. Fasaxa QEL waxaa loo qaadan karaa si kala googo’an oo ku xiran baahida.

## Maxaan yeelayaa haddii aanu loo shaqeeyaha ogolaan fasaxa?

Cabasho u soo gudbi Wasaaradda Shaqada ee Mareykanka Soo wac 1-(866) 4-US-WAGE ama 1-(866) 487-9243. Ama soo booqo bogooda internetka ee: <http://www.dol.gov/agencies/whd>.

Waxaa kale ii aad qabsan kartaa qareen si aad u diiwaangeliso dacwad.



*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.